




# DAWLADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

## XAFIISKA XISAABIYAHHA GUUD

	2020	2021	2022	2023	2024
Tax Revenue	139,529,217	162,766,910	181,691,842	224,631,762	266,763,916
Other Revenue	71,704,628	66,794,410	80,977,903	104,859,950	102,589,875
Total Domestic Revenue	\$ 211,233,845	\$ 229,561,321	\$ 262,669,745	\$ 329,491,711	\$ 369,353,791

# WARBIXINTA FULINTA MIISAANIYAD SANNADEEDKA - BISHA MAARSO 2026

Domestic Revenue Vs External Grants



Jaantuska 2aad: Dhabta Dakhliga Canshuurta Jan 2025



MAY 2026

# WARBIXINTA FULINTA MIISAANIYADDA

Bisha Maarso 2026

WAXAA SOO SAARAY WARBIXINTAAN

**XAFIISKA XISAABIYAHA GUUD EE DAWLADDA**

WAXAAD KA HELI KARTAAN WARBIXINTAAN BOGGA XAFIISKA XISAABIYAHA  
GUUD

[www.oags.gov.so](http://www.oags.gov.so)

Dhismaha Wasaaradda Maaliyadda  
Degmada Shangani  
Mogadishu – Somalia  
Email: [reporting@oags.gov.so](mailto:reporting@oags.gov.so)

## TUSMADA WARBIKINTA

<b>TUSMADA WARBIKINTA .....</b>	<b>iii</b>
<b>HORDHAC .....</b>	<b>1</b>
<b>DHABTA DAKHLIGA IYO MIISAANIYADDA SANNADKA 2026.....</b>	<b>2</b>
<b>DAKHLIGA DAWLADDA BISHA MAR 2026 &amp; 2025 .....</b>	<b>3</b>
DAKHLIYADA KALE .....	7
<b>DEEQAHA DIBADDA .....</b>	<b>7</b>
<b>DHABTA KHARASHAADKA JAN-MAR IYO MIISAANIYADDA SANNADKA 2026 .....</b>	<b>9</b>
<b>DHABTA KHARASHAADKA BILAHA JAN ILAA MAR, HAY'ADAHA DAWLADDA.....</b>	<b>14</b>
<b>KHARASHAADKA JOOGTADA AH .....</b>	<b>14</b>
<b>KHARASHAADKA MASHAARIICDA.....</b>	<b>15</b>
<b>Lifaaqa 1<sup>aad</sup>: Faahfaahinta Dhabta iyo Miisaaniyadda Kharashaadka Joogtada ah Jan-Mar 2026 .....</b>	<b>16</b>
<b>Lifaaqa 2<sup>aad</sup>: Faah-faahinta Dhabta iyo Miisaaniyadda Kharashaadka Mashaariicda Jan-Mar 2026.....</b>	<b>53</b>
<b>Lifaaqa 3<sup>aad</sup>: Soo koobid Dhabta iyo Miisaaniyadda Kharashaadka Mashaariicda Ee Hay'adaha Jan-Mar, 2026.....</b>	<b>76</b>

## Liiska Jaantusyada

Jaantuska 1 <sup>aad</sup> : Dhabta Dakhliga Dawladda – Bisha Mar 2026 & 2025 .....	4
Jaantuska 2 <sup>aad</sup> : Dakhliga Gudaha – bilaha Jan-Feb 2026 & 2025 .....	4
Jaantuska 3 <sup>aad</sup> : Qaybaha Dakhliga Gudaha Mar 2026.....	5
Jaantuska 4 <sup>aad</sup> : Dakhliga Canshuuraha Jan-Mar 2026 & 2025.....	6
Jaantuska 5 <sup>aad</sup> : Deeqaha Dibadda Jan-Mar 2026 & 2025 .....	8
Jaantuska 6 <sup>aad</sup> : Kharashaadka Joogtada ah Jan-Mar, 2025-2026.....	10
Jaantuska 7 <sup>aad</sup> : Kharashaadka Mashaariicd, Jan & Mar - 2025-2026 .....	11

## Liiska Shaxaha

Shaxda 1 <sup>aad</sup> : Dhabta iyo Miisaaniyadda Dakhliga Jan-Mar 2026.....	2
Shaxda 2 <sup>aad</sup> : Dhabta Dakhliga Mar 2026 & 2025 .....	3
Shaxda 3 <sup>aad</sup> : Iskubiirinta Dakhliga Gudaha ee Jan-Mar ee sannadaha 2026 & 2025 .....	5
Shaxda 4 <sup>aad</sup> : Deeqaha Dibadda Jan-Mar 2026 iyo 2025 .....	7
Shaxda 5 <sup>aad</sup> : Dhabta & Miisaaniyadda Kharashaadka Guud Dawladda Jan-Mar 2026,.....	9
Shaxda 6 <sup>aad</sup> : Kharashaadka la bixiyey Bisha Maarso 2026 iyo 2025 .....	11
Shaxda 7 <sup>aad</sup> : Iskudarka Kharashaadka la bixiyey Jan- mar 2026 & 2025.....	13
Shaxda 8 <sup>aad</sup> : Dhabta Kharashaadka, Hay'adaha Dawladda.....	14

## HORDHAC

Warbixinta fulinta miisaaniyadda waa warbixin bille ah, waxayna faahfaahinaysaa fulinta ama dhaqangelinta miisaaniyad sannadeedka labada aqal ee barlamaanka ansixiyaan. Waxayna isbarbardhig ku samaynaysaa dakhliga dhabta ah ee lasoo uruuriyey iyo kharashaadka Dawladda ee la bixiyey sannadka gudihiisa iyo miisaaniyad sannadeedka dakhliga iyo kharashaadka dawladda. Miisaaniyadu waxay waafaqsan tahay miisaaniyad sannadeedka 2026 oo ay ansixiyeen labada aqal ee barlamaanka.

Wadarta Dakhliga Gudaha ee miisaaniyad sannadeedka 2026 ayaa ah **\$479M** oo **35%** ka ah wadarta miisaaniyadda dakhliga Dawladda, halka wadarta deeqaha dibadda oo isugu jirta kab miisaaniyaddeed iyo mashaariic ee ku jiray miisaaniyadda ay tahay **\$879M** oo **65%** ka ah wadarta dakhilga miisaaniyad sannadeedka 2026.

Wadarta kotalagalka miisaaniyadda ee Kharashaadka Joogtada ah ayaa ah **\$682M** waxayna ka tahay **49%** wadarta miisaaniyadda kharashaadka guud, halka kotalagalka miisaaniyadda kharashaadka mashaariicda ay tahay **\$704M** waxayna ka tahay **51%** wadarta miisaaniyadda kharashaadka guud ee sannadka 2026.

Iskudarka Dakhliga Gudaha ee la helay bilaha Janaayo ilaa Maarso 2026 ayaa ahayd **\$100M** wuxuuna ka badan yahay **7%** iskudarka dakhliga gudaha ee la helay Bilaha Janaayo ilaa Maarso 2025. Sidoo kale iskubiirinta deeqaha dibadda ee la helay bilaha Janaayo ilaa Maarso 2026 ayaa ahayd **\$53M** waxayna ka yartahay **18%** iskubiirinta deeqaha dibadda la bilaha Janaayo ilaa Maarso 2025.

Wadarta miisaaniyadda kharashaadka guud ee la bixiyey bilaha Janaayo ilaa Maarso 2026 ayaa ahayd **\$171M** waxayna kayar tahay **8%** wadarta kharashaadka guud ee la bixiyey bilaha Janaayo ilaa Maarso ee sannad maaliyadeedkii hore ee 2025.

Warbixintaan ayaa ka koobnaan doontaa saddex qaybood. Qaybta koowaad ee warbixinta fulinta miisaaniyadda oo lagu faahfaahin doonaa dhabta dakhliga Dawladda; Dakhliga Gudaha iyo Deeqaha Dibadda, iyadoo la isbarbardhigi doono dhabta dakhliga iyo miisaaniyad sannadeedka qaybaha dakhliga Dawladda ka kooban tahay.

Qaybta labaad ee warbixinta waxaa lagu faahfaahin doonaa kharashaadka dawladda ee la bixiyey billaha Janaayo ilaa Maarso 2026, Iyadoo loo fiirinaayo waafaqsanaanta sida loogu ansixiyey miisaaniyad sannadeedka 2026. Waxaana loo kala qaadi doonaa kharashaadka dawladda labo qaybood; kharashaadka Joogtada ah iyo kharashaadka mashaariicda.

Warbixinta qaybta saddexaad waxaa ku lifaaqan faahfaahinta isticmaalka miisaaniyadda ee hay'adaha dawladda, loona kala qaaday sida ay hay'adaha u fuliyeen kharashaadka joogtada ah iyo mashaariicda ee miisaaniyad sannadeedka 2026. Lifaaqa koowaad ayaa lagu soo bandhigi doonaa shax faahfaahsan ee isticmaalka hay'adaha ee miisaaniyadda kharashaadka joogtada ah, lifaaqa labaad ayaa lagu soo bandhigi doonaa doonaa shaxda isticmaalka hay'adaha ee kharashaadka miisaaniyadda mashaariicda 2026. Lifaaqa 3<sup>aad</sup> soo koobid fulinta mashaariicda.

## DHABTA DAKHLIGA IYO MIISAANIYADDA SANNADKA 2026

Wadarta dakhliga ee miisaaniyadda asalka ayaa ah \$ **1,357,811,103** oo la filaaayo in ay Dawladda soo uruuriso sannad maaliyadeedka 2026 gudihiisa. Miisaaniyada Dakhliga Gudaha ayaa ahayd \$ **478,974,645** oo **35%** ka ah wadarta miisaaniyad sannadeedka, halka deeqaha dibada la filaaayo in la soo xareeyo ay tahay \$ **878,836,458** oo **65%** ka ah wadarta miisaaniyadda dakhliga ee sannadka 2026.

	Faah-Faahin	Dhabta Mar 2026	Dhabta Jan-Mar 2026	Kutalagalka Miisaaniyadda	% Fulinta
	<b>Canshuuraha</b>				
111	Canshuurta Dakhliga & Faa'iidooyinka	4,185,653	12,367,663	53,262,627	23%
114	Canshuurta Adeegga & Agabka	4,398,488	14,922,850	77,001,675	19%
115	Canshuurta Ganacsiga Dibadda	12,360,149	41,657,823	182,424,346	23%
116	Canshuuraha Kale	763,185	1,725,086	14,412,241	12%
	<b>Wadarta Canshuurta</b>	<b>21,707,474</b>	<b>70,673,422</b>	<b>327,100,889</b>	<b>22%</b>
	<b>Dakhliyada Kale</b>	-	-	3,244,397	0%
141	Dakhliga Hantida	10,611,945	28,756,221	145,284,670	20%
142	Dakhliga libka Agabka iyo Adeegga	138,614	320,677	1,089,067	29%
143	Ganaaxa, Ciqaabta iyo Luminta Dacwadaha	800,000	800,000	-	0%
145	Kharashka, Khidmadaha, iyo Sheegashooyink	-	-	2,255,623	0%
	<b>Wadarta Dakhliyada Kale</b>	<b>11,550,559</b>	<b>29,876,898</b>	<b>151,873,756</b>	<b>20%</b>
	<b>Wadarta Dakhliga Gudaha</b>	<b>33,258,034</b>	<b>100,550,320</b>	<b>478,974,645</b>	<b>21%</b>
	<b>DEEQAHA DIBADDA</b>				
131	Deeqaha laba dhinac	-	-	27,000,000	0%
132	Deeqaha Dhincacyada badan	23,129,205	53,323,172	851,836,458	6%
	<b>Wadarta Deeqaha Dibadda</b>	<b>23,129,205</b>	<b>53,323,172</b>	<b>878,836,458</b>	<b>6%</b>
	<b>Wadarta Dakhliga Dawladda</b>	<b>56,387,239</b>	<b>153,873,492</b>	<b>1,357,811,103</b>	<b>11%</b>
32	<b>Hantida Maaliyadeed</b>				
321	Hantida Maaliyadeed	343,764	1,185,979	-	0%
	<b>Wadarta Hantida Maaliyadeed</b>	<b>343,764</b>	<b>1,185,979</b>	-	<b>0%</b>
	<b>Wadarta Lacag Qabashada Guud</b>	<b>\$56,731,003</b>	<b>\$155,059,471</b>	-	<b>0%</b>

Shaxda 1<sup>aad</sup>. Dhabta iyo Miisaaniyadda Dakhliga Jan-Mar 2026

Shaxda 1<sup>aad</sup> waxay soo bandhigaysaa dhabta dakhliga ee la soo uruuriyey bilaha Janaayo iyo Maarso ee miisaaniyad sannadeedka 2026. Wadarta dakhliga la helay bilaha Janaayo ilaa Maarso ayaa ah **\$154M** oo u dhiganta **11%** wadarta dakhliga miisaaniyad sannadeedka 2026. Dakhliga Gudaha waxaa ka soo xarooday **\$101M** una dhiganta **21%** wadarta miisaaniyadda dakhliga gudaha, halka Deeqaha dibadda la helay **\$53M** una dhiganta **6%** wadarta deeqaha dibadda ee miisaaniyad sannadeedka 2026.

Wadarta dakhliga gudaha ee la helay bilaha Janaayo ilaa Maarso ayaa ahayd **\$101M** oo **65%** ka ah wadarta dakhliga dawladda, halka deeqaha dibadda la helay **\$53M** oo **35%** ka ah wadarta dakhliga dawladda ee miisaaniyad sannadeedka 2026. Dakhliga Canshuuraha ayaa lasoo uruuriyey **\$71M** oo u dhiganta **70%** wadarta dakhliga gudaha ee la helay bilaha Jan ilaa Mar 2026. Dakhliyada kale ayaa la helay **\$30M** oo **30%** ka ah wadarta dakhliga gudaha ee la helay.

Canshuurta Dakhliga iyo Faa'iidada ayaa la helay bilaha Janaayo iyo Maarso dakhli dhan **\$12M** oo u dhiganta **23%** wadarta miisaaniyad sannadeedka canshuurtaan. Canshuurta Agabka iyo Adeegga ayaa la soo uruuriyey **\$15M** oo ah **19%** miisaaniyadda sannadka, Sidoo kale Canshuurta Ganacsiga Dibadda ayaa lasoo uruuriyey **\$42M** oo u dhiganta **23%** wadarta miisaaniyad sannadeedka 2026 ee canshuuraha ganacsiga dibadda. Canshuuraha kale ayaa la helay **\$2M** una dhiganta **12%** wadarta miisaaniyad sannadeedka canshuuraha kale ee sannadka 2026.

Dakhliyada kale waxaa la soo uruuriyey bilaha Jan ilaa Mar 2026 dakhli dhan \$ **30M** oo u dhiganta **20%** miisaaniyad sannadeedka 2026 ee dakhliyada kale.

Deeqaha dhincayada badan waxaa la helay bilaha Janaayo ilaa Maarso deeq dhan **\$53M** oo u dhiganta **6%** miisaaniyad sannadeedka 2026 ee deeqaha dhincayada badan.

Wadarta dakhliga Hantida Maaliyadeed ee la soo uruuriyey bilaha Janaayo ilaa Maarso ayaa ahayd **\$1,185,979**. Wa dayn horay loo siiyey bangiyada ganacsiga si ay maalgalin ugu sameeyaan ganacsiyada yaryar ee dalka. Lacagta ka muuqata halkaan waa lacag celin ay sameeyaan bangiyada gaarka si waafaqsan heshiiska ay la geen hay'adda Gaargaar ee hoostagta Wasaaradda Maaliyadda.

### DAKHLIGA DAWLADDA BISHA MAR 2026 & 2025

Dakhliga Dawladda wuxuu ka soo xaroodaa dakhliga gudaha iyo deeqaha dibadda. Dakhliga Gudaha ayaa loo kala qaadaa dakhliga canshuuraha iyo dakhliyada kale. Shaxda 2<sup>aad</sup> waxay isbarbardhigaysaa dhabta dakhliga Dawladdu heshay bisha Maarso ee sannadaha 2026 iyo 2025.


Faah-Faahin	Dhabta Mar 2026	Dhabta Mar 2025	Koror/ Naaqus
<b>Dakhliga Gudaha &amp; Deeqaha Dibadda</b>	<b>\$56,387,239</b>	<b>\$69,138,128</b>	<b>-18%</b>
<b>Dakhliga Gudaha</b>	<b>33,258,034</b>	<b>34,910,198</b>	<b>-5%</b>
<b>Dakhliga Canshuuraha</b>	<b>21,707,474</b>	<b>26,174,217</b>	<b>-17%</b>
Canshuurta Dakhliga & Faa'iidooyinka	4,185,653	6,167,976	-32%
Canshuurta Adeegga & Agabka	4,398,488	4,797,670	-8%
Canshuurta Ganacsiga Dibadda	12,360,149	13,997,597	-12%
Canshuuraha Kale	763,185	1,210,975	-37%
<b>Dakhliyada Kale</b>	<b>11,550,559</b>	<b>8,735,981</b>	<b>32%</b>
Dakhliga Iibka Agabka iyo Adeegga	10,611,945	8,647,363	23%
Ganaaxa, Ciqaabta iyo Luminta Dacwadaha	138,614	88,618	56%
Wareejinta aan meel kale lagu Qeexin	800,000	-	0%
<b>DEEQAHA DIBADDA</b>	<b>23,129,205</b>	<b>34,227,930</b>	<b>-32%</b>
Deeqaha laba dhinac	-	929,713	-100%
Deeqaha Dhincacyada badan	23,129,205	33,298,217	-31%

Shaxda 2<sup>aad</sup>: Dhabta Dakhliga Mar 2026 & 2025

Sida ka muuqato shaxda 2<sup>aad</sup> dakhliga Dawladda ee la helay bisha Mar 2026 ayaa ahaa **\$56M**, wuxuuna ka yar yahay **18%** wadarta dakhliga Dawladda ee la helay bisha Maarso 2025. Dakhliga gudaha ayaa la helay **\$33M** oo ka yaryahay **5%** wadarta dakhliga gudaha ee la helay bisha Maarso 2025. Halka deeqaha dibadda la helay bisha maarso 2026 deeq dhan **\$23M** oo ay ka yar **32%** wadarta Deeqaha la helay bisha Maarso 2025.

Canshuurta Dakhliga & Faa'iidooyinka ayaa la soo uruuriyey bisha Mar 2026 dakhli dhan **\$4M** oo ka yar **32%** Canshuurta Dakhliga & Faa'iidooyinka ee la helay bisha Mar 2025. Hoos u dhaca ugu badan ee canshuurtan waxay ka timid Canshuurta Faa'iidada Shirkadaha ee la helay bisha Mar 2026.

Canshuurta Agabka iyo Adeegga ayaa la soo uruuriyey bisha Mar 2026 dakhli dhan **\$4M** oo ka yar **8%** Canshuurta Agabka iyo Adeega ee la helay bisha Mar 2025. Canshuurta Ganacsiga dibadda ayaa la soo uruuriyey **\$12M** bisha Mar 2026 waxayna ka yar tahay **12%** canshuurta Ganacsiga dibadda ee la helay bisha Maarso 2025.



Jaantuska 1<sup>aad</sup>. Dhabta Dakhliga Dawladda – Bisha Mar 2026 & 2025


Sida ka muuqata Jaantuska 1<sup>aad</sup> Dakhliga Gudaha ee la helay bisha Mar 2026 ayaa ahaa **\$33M** wuxuuna ka hooseeyaa **\$2M** dakhliga gudaha ee la helay bisha Maarso 2025. Deeqaha dibadda ee la helay bisha Maarso 2026 ayaa ah **\$23M** waxayna ka hooseesaa **\$11M** deeqaha dibadda ee la helay bisha Mar 2025.

Deeqaha dibadda ee la helay bisha Maarso 2026 ayaa laga kala helay: Bangiga Adduunka **\$22M**, Bangiga Hormarinta Afrika **\$ 947K**.

### DAKHLIGA GUDAHA Jan-Mar

Odooroska miisaaniyad sannadeedka dakhliga gudaha ayaa ahayd **\$479M**, waxaana la helay bilaha Janaayo iyo Maarso 2026 dakhli dhan **\$101M** oo u dhiganta **21%** miisaaniyad sannadeedka dakhliga gudaha. Iskudarka Dakhliga Gudaha ee la helay bilaha Janaayo ilaa Maarso ee sannadka 2026 ayaa **7%** ka badan iskudarka dakhliga gudaha ee la helay bilaha Janaayo ilaa Maarso ee sannadka 2025.

Sida ka muuqata jaantuska 2<sup>aad</sup>, wuxuu muujinayaa isbarbardhiga dakhliga gudaha ee la helay bilaha Janaayo ilaa Maarso ee sannadaha 2026 iyo 2025, Dakhliga gudaha ayaa la helay bisha Maarso 2026 **\$33M** oo **5%** ka hooseeya wadarta dakhliga gudaha ee la helay bisha Mar 2025.



Jaantuska 2<sup>aad</sup>: Dakhliga Gudaha – bilaha Jan-Feb 2026 & 2025


Sida ka muuqata jaantuska 2<sup>aad</sup>, wuxuu muujinayaa isbarbardhiga dakhliga gudaha ee la helay bilaha Janaayo ilaa Maarso sannadaha 2026 iyo 2025.

Bisha Janaayo ee sannadka 2026 ayaa la helay **\$33M** oo **24%** ka badan dakhliga gudaha ee la helay bisha Janaayo 2025. Sidoo dakhliga gudaha ayaa kordhay Bisha Febraayo ee sannadka 2026, waxaana la helay **\$34M** oo ka badan **6%** dakhliga gudaha ee la helay bisha Febraayo 2025.

Dakhliga gudaha ayaa hoos u dhacay Bisha Maarso ee sannadka 2026, waxaana la helay **\$33M** oo ka yar **5%** wadarta dakhliga gudaha ee la helay bisha Maarso 2025.

Sida ka muuqato jaantuska 3<sup>aad</sup>, iskudarka dakhliga gudaha ee la helay bilaha Janaayo iyo Maarso ee sannadka 2026, wuxuu **70%** kasoo xarooday dakhliga canshuuraha, halka **30%** kasoo xarooday dakliyada kale.

Dakhliga canshuuraha ayaa ka soo xarooday canshuuraha kala duwan oo ay dawladdu qaado, waxaan ugu badan canshuurta kasoo xarooto dekada iyo garoonka diyaaraaha Magaalada Muqdishu.



Jaantuska 3<sup>aad</sup>: Qaybaha Dakhliga Gudaha Mar 2026

canshuurta mushaarka shaqaalaha Dawladda iyo kuwa gaarka ah, canshuurta dakhliga kirooyinka daaraha iyo Canshuurta Faa'iidada shirkadaha.

Iskubiirinta Canshuurta Dakhliga iyo Faa'iidooyinka ayaa ka hoosaysa **23%** bilaha Jan-Mar sannadka 2026, waxaana la helay dakhli dhan **\$12M**, halka bilaha Janaayo ilaa Maarso ee sannadka 2025 la helay **\$16M** oo ka sareeyso lacag dhan **\$4M** canshuurta la helay bilaha Jan-Mar ee sannadka 2026.

Iskubiirinta Canshuurta Faa'iidada Shirkadaha ayaa hoos u dhacday bilaha Janaayo ilaa Maarso ee sannad maaliyadeed 2026, waxayna ka hoosaysaa **51%** wadarta Canshuurta Dakhliga iyo Faa'iidooyinka ee la helay bilaha Janaayo ilaa Maarso 2025. Sidoo kale canshuurta kirada daaraha ayaa la helay koror dhan **\$431K** ka saraysa **24%** wadarta Canshuurta kirada daaraha ee la helay bilaha Jan ilaa Mar 2025. Canshuurta Mushaarka shaqaalaha ayaa laga helay **\$6M** bilah Jan ilaa Mar ee sannadka 2026, waxayna ka yar yahay **4%** canshuurta mushaarka shaqaalah ee lahay bilaha Jan iyo Mar 2025.

Faah-Faahin	Dhabta Dakhliga Jan-Mar 2026	Dhabta Dakhliga Jan-Mar 2025	Koror/ Naaqus
<b>Dakhliga Gudaha</b>	<b>\$100,550,320</b>	<b>\$93,890,358</b>	<b>7%</b>
<b>Canshuuraha</b>	<b>70,673,422</b>	<b>67,956,535</b>	<b>4%</b>
Canshuurta Dakhliga & Faa'iidooyinka	12,367,663	16,121,349	-23%
Canshuurta Agabka & Adeegga	14,922,850	12,286,059	21%
Canshuurta Ganacsiga Dibadda	41,657,823	37,427,276	11%
Canshuuraha Kale	1,725,086	2,121,852	-19%
<b>Dakhliyada Kale</b>	<b>29,876,898</b>	<b>25,933,823</b>	<b>15%</b>
Dakhliga Iibka Agabka iyo Adeegga	28,756,221	25,720,652	12%
Ganaaxa, Ciqaabta iyo Luminta Dacwadaha	320,677	213,171	50%
Wareejinta aan meel kale lagu Qeexin	800,000	-	0%

Shaxda 3<sup>aad</sup>: Iskubiirinta Dakhliga Gudaha ee Jan-Mar ee sannadaha 2026 & 2025

## CANSHUURTA AGABKA IYO ADEEGGA

Waxaa la helay bilaha Jan iyo Mar 2026 dakhli dhan **\$15M** oo ka badan **21%** marka la babardhigo iskubiirinta Canshuurta Agabka iyo Adeega ee la helay bilaha Janaayo iyo Maarso 2025. Waxayna ka tahay **21%** wadarta Dakhliga Canshuuraha. Waxaa laga qaadaa canshuurtaan ganacsiyada dalka

waxaana ka mid ah; canshuurta gedista ee suuqyada, canshuurta wadamarista gawaarida iyo canshuurta gedista ee laga qaado shirkadaha bixiya adeegyada ganacsiga.


Canshuurta gadista ee badeecadaha kasoo daga dekadda iyo suuqyada ayaa laga helay bilaha Janaayo ilaa Maarso 2026 canshuur dhan **\$13M** oo u dhiganta **89%** wadarta Canshuurta Agabka iyo Adeega. Canshuuraha Wado-marist, iyo Nootaayooyinka ayaa laga helay **\$2M** oo u dhiganta **11%** wadarta Canshuurta Agabka iyo Adeegga ee la soo uruuriyey bilaha Janaayo ilaa Maarso 2026.

### CANSHUURTA GANACSIGA DIBADDA

Canshuurta Ganacsiga Dibadda waa canshuurta laga qaado badeecadaha kasoo daga Dekadda iyo Garoonka Diyaraadaha Muqdisho. Waana dakhliga ugu muhiimsan dakhliga Dawladda kasoo xarooda gudaha dalka. Bilaha Janaayo ilaa Maarso ee sannadka 2026 waxaa ka soo xarooday canshuur dhan **\$42M** oo u dhiganta **59%** wadarta Dakhliga Canshuuraha, wuxuuna ka yahay **41%** wadarta dakhliga gudaha ee la helay bilaha Janaayo ilaa Maarso sannadka 2026. Dakhliga la helay bilaha Janaayo ilaa Maarso ee sannadka 2026 ayaa sare u kac dhan **11%** sameeyey marka la barbardhigo wadarta dakhliga la helay bilaha Janaayo ilaa Maarso ee sannadka 2025.

### CANSHUURAH KALE

Miisaaniyad sannadeedka Canshuuraha kale ayaa ah **\$14M**, waxaana ka soo xarooday bilaha Jan ilaa Mar 2026 dhakhli dhan **\$2M** oo u dhiganta **12%** wadarta Dakhliga Canshuuraha kale ee miisaaniyad sannadeedka 2026. Dakhliga la helay bilaha Jan ilaa Mar 2026 ayaa **2%** ka aha wadarta dakhliga canshuuraha. Waxayna ka soo xarootaa canshuuraha laga qaado badqabka gawaarida, farankaboolada qaansheegooyinka ganacsiga ee adeegyada ama badeecadaha kasoo daga Dekadda iyo Garoonka Diyaarahadaha. Iskudarka Canshuuraha kale ee la soo uruuriyey bilaha Janaayo iyo Maarso ee sannadka 2026 ayaa **19%** ka hooseyso marka la barbardhigo iskubiirinta canshuuraha kale la helay bilaha Jan ilaa Mar ee sannadka 2025.



Sida ka muuqato jaantuska 4<sup>aad</sup> oo soo bandhigaayo isbarbardhig qaybaha dakhliga canshuuraha ee la helay bilaha Janaayo iyo Maarso ee sannadaha 2026 iyo 2025. Wuxuuna kaloo muujinayaa kororka iyo naaqska qaybaha dakhliga canshuuraha marka la is barbardhigayo dakhliga canshuuraha la helay bilaha Janaayo ilaa Maarso ee sannadaha 2026 iyo 2025.

Jaantuska 4<sup>aad</sup>: Dakhliga Canshuuraha Jan-Mar 2026 & 2025

## DAKHLIYADA KALE

Dakhliyada kale, waa dakhli ka soo xarooda adeegyada maamul oo ay bixiso Dawladda, sida bixinta shatiyada ganacsiga, adeegyada dekada iyo garoonka diyaaradaha, bixinta baasaboorada, iyo dalkugalka ajaanibta. Waxaana ka soo xarooday bilaha Janaayo iyo Maarso 2026 dakhli dhan **\$30M** oo ka badan **15%** dakhliyada kale ee la helay bilaha Janaayo iyo Maarso ee sannad maaliyadeedka 2025.

Dakhliyada kale ee lasoo uruuriyey bilaha Jan ilaa Mar 2026, waxaa **\$15M** oo u dhiganta **50%** wadarta dakhliyada kale kasoo xarootay adeegyada maamul ee Dawladdu ka bixiso Dekadda iyo Groonka diyaaradaha magaalada Muqdisho. Bixinta Baasaboorada iyo dalkugalka ajaanibta waxaa ka soo xarooday dakhli dhan **\$4M** oo **13%** ka ah wadarta dakhliyada kale. Diyaaradaha mara hawada Soomaaliya waxaa laga helay **\$6M** oo u dhiganta **19%** wadarta Dakhliyada Kale ee la helay bilaha Jan ilaa Mar 2026. Khidmaha Isgaarsiinta ayaa laga helay **\$2M** oo u dhiganta **7%** wadarta dakhliyada kale.

Sida ka muuqato shaxda 3<sup>aad</sup>, iskudarka dakhliga kasoo xarooday Ganaaxa iyo Ciqaabta ayaa kordhay **50%** bilaha Jan ilaa Mar 2026, waxaana la helay dakhli dhan **\$321K**, halka bilaha Jan ilaa Mar ee sannadka 2025 la helay dakhli dhan **\$213K**.

## **DEEQAHA DIBADDA**

Deeqaha Dibadda oo ka ah **65%** wadarta odoroska dakhliga miisaaniyadda Dawladda 2026, waxaa la helay **\$53M** oo u dhiganta **6%** miisaaniyad sannadeedka deeqaha dibadda. Wadarta deeqaha dibadda ee la helay bilaha Janaayo ilaa Maarso 2026 ayaa hoos uga dhacay **18%**, marka loo fiiriyo wadarta deeqaha dibadda ee la helay bilaha Janaayo ilaa Maarso 2025. Deeqaha dhinacyada badan ayaa la helay dakhli dhan **\$53M** kana yar **3%** deeqaha dhinacyada badan ee la helay bilaha Janaayo ilaa Maarso 2025.


Faah-Faahin	Dhabta Dakhliga Jan-Mar 2026	Dhabta Dakhliga Jan-Mar 2025	Koror/ Naaqus
<b>DEEQAHA DIBADDA</b>	<b>53,323,172</b>	<b>65,131,268</b>	<b>-18%</b>
<b>Deeqaha laba dhinac</b>	<b>-</b>	<b>10,287,693</b>	<b>-100%</b>
Turkiga	-	7,500,000	-100%
Imaaraatka Carabta	-	2,787,693	-100%
<b>Deeqaha Dhinacyada badan</b>	<b>53,323,172</b>	<b>54,843,575</b>	<b>-3%</b>
Bangiga Adduunka	45,293,157	52,109,729	-13%
Bangiga Harumarinta Afrika	1,301,152	1,093,694	19%
Qaramada Midoobay	1,292,861	1,295,658	0%
Hay'ada Waxbarashada Addunka (GPE)	5,411,051.18	344,494.40	1471%
Mashruuca Xoojinta Xogta Cilmi baarista	24,950.00	-	

Shaxda 4<sup>aad</sup>: Deeqaha Dibadda Jan-Mar 2026 iyo 2025

Deeqaha dibadda waxay isugu jirtaa deeq kab miisaaniyadeed oo ay Dawladdu ka hesho hay'ado caalami ah iyo Dawladaha kabo miisaaniyadda Dawladda iyo kab mashaariic oo loogu talagalay in lagu maalgaliyo mashaariicda laga fuliyo dalka gudahiisa.

Sida ka muuqato shaxda 4<sup>aad</sup> Deeqaha dhinacyadda badan ee la helay bilaha Jan ilaa Mar 2026 Bangiga Adduunka ayaa Dawladda ugu deeqay **\$45M** oo u dhiganta **85%** wadarta deeqda, Bangiga Horumarinta Afrika ayaa Dawladda ugu deeqday **\$1.3M** una dhiganta **2%** wadarta deeqda, Qaramada Midoobay ayaa laga helay deeq dhan **1.3M** una dhiganta **2%** wadarta deeqda, Hay'ada Waxbarashada Addunka (GPE) ayaa Dawladda ugu deeqday **5.5M** una dhiganta **10%** wadarta deeqaha dibadda ee la helay bilaha Janaayo ilaa Maarso 2026.

Sidoo kale muuqaalka shaxda 4<sup>aad</sup> waxuu ku tusinayaa in Mashruuca Xoojinta Xogta Cilmi barista ay ka soo xarootay dakhli dhan **25K** bilaha Jan ilaa Feb 2026.



Jaantuska 5<sup>aad</sup>: Deeqaha Dibadda Jan-Mar 2026 & 2025

Sida ka muuqato jaantuska 5<sup>aad</sup> oo soo bandhigaayo isbarbardhig deeqaha dibadda ee la helay bilaha Jan ilaa Mar ee sannadaha 2026 iyo 2025.

Bisha Jan waxaa la helay deeq dhan \$10M oo 92% ka badan deeqda la helay bisha Jan 2025. Balse wuxuu hoos u dhacay deeqda la helay bish Feb 2026, waxaana la helay deeq dhan \$20M oo ka hooseeya 22% deeqda la helay bish Feb 2025.

Halka bisha Mar 2026 la helay deeq dhan 23M kana hooseyso 32% deeqdii la helay Bishii Mar 2025.

## DHABTA KHARASHAADKA JAN-MAR IYO MIISAANIYADDA SANNADKA 2026

Kharashaadka Dawladda waxaa loo kala qaadaa, kharashaadka joogtada ah iyo mashaariicda. Kharashaadka joogtada ah waa kharashaadka Dawladda ee laga maalgaliyo dakhliga gudaha iyo kabka miisaaniyadeed oo ay Dawladdu ka hesho deeqaha dibabadda. Waxaa laga bixiyaa kharashaadka socodsiinta hawlaha Dawladda, sida mushaaraadka shaqaalaha, Isticmaalka Agabka iyo Adeegga ee hay'adaha Dawladda. Kharashaadka Mashaariicda waxaa laga maalgaliyaa kabka mashaariicda ee Dawladda ka hesho deeqaha dibadda.

	Faah-Faahin	Dhabta Mar 2025	Dhabta Jan-Mar 2026	Isbadalka Miisaaniyadda ee Kala wareejimaha	Kutalagalka Miisaaniyadda	% Fulinta
	<b>Kharashaadka Joogtada</b>					
21	Mushaarka Shaqaalaha	35,870,997	86,333,172	379,055,558	375,572,558	23%
22	Isticmaalka Agabka & Adeega	10,135,718	22,896,263	178,594,944	181,534,294	13%
24	Dulsaarka	164,782	1,087,447	6,715,000	7,000,000	16%
26	Deeqaha	3,917,816	10,667,660	90,141,266	90,141,266	12%
27	Faa'idada Bulshada	-	-	10,000,000	10,000,000	0%
31	Hantida aan Maaliyadda Ahayn	562,729	600,654	17,882,016	18,140,666	3.36%
	<b>Wadarta Kharashaadka Joogtada</b>	<b>50,652,042</b>	<b>121,585,196</b>	<b>682,388,785</b>	<b>682,388,785</b>	<b>18%</b>
	<b>Kharashaadka Mashaariicda</b>					
21	Mushaarka Shaqaalaha	225,880	367,450	6,070,400	3,640,400	6%
22	Isticmaalka Agabka & Adeega	9,363,953	14,264,785	288,802,008	289,907,080	5%
25	Kaalmo Dhaqaale	-	-	8,660,000	8,660,000	0%
26	Deeqaha	8,717,403	16,519,091	168,967,345	170,096,273	10%
27	Faa'idada Bulshada	-	-	670,000	-	0%
28	Other expenses	12,241,114	12,241,114	33,205,110	34,105,110	37%
31	Hantida aan Maaliyadda Ahayn	4,075,939	5,927,933	198,043,595	198,009,595	3%
	<b>Wadarta Kharashaadka Mashaariicda</b>	<b>34,624,289</b>	<b>49,320,373</b>	<b>704,418,458</b>	<b>704,418,458</b>	<b>7%</b>
	<b>Wadarta Kharashaadka Guud</b>	<b>\$85,276,332</b>	<b>\$170,905,569</b>	<b>\$1,386,807,242</b>	<b>\$1,386,807,242</b>	<b>12%</b>
	<b>Lacag Bixinnada Kale</b>					
32	Hantida Maaliyadeed	1,990,665	1,990,665	-	-	0%
	<b>Wadarta Lacag Bixinta Guud</b>	<b>\$87,266,996</b>	<b>\$172,896,234</b>			

Shaxda 5<sup>aad</sup>: Dhabta & Miisaaniyadda Kharashaadka Guud Dawladda Jan-Mar 2026,

## KHARASHKA BISHA MAARSO 2026

Sida ka muuqato shaxda 5<sup>aad</sup> waxaa la bixiyey bisha Maarso 2026 kharash dhan **\$85M**, Kharashaadka joogtada ah waxaa laga bixiyey **\$51M** oo u dhiganta **59%** wadarta kharashaadka guud, halka kharashaadka mashaariicdana laga bixiyey **\$35M** oo u dhiganta **41%** wadarta kharashaadka guud ee la bixiyey bisha Maarso 2026.

Mushaarka shaqaalaha ayaa ugu badan kharashaadka la bixiyey bisha Maarso waxaana la bixiyey **\$36M** oo u dhiganta **71%** wadarta kharashaadka joogtada ee la bixiyey. Kharashaadka Agabka iyo Adeegga ayaa la bixiyey **\$10M** oo u dhiganta **20%** wadarta kharashaadka joogtada ah ee la bixiyey bisha Maarso 2026. Deeqaha la siiyo dawlad goboleedyada ayaa lagu bixiyey **\$4M** oo **8%** ka ah wadarta kharashaadka joogtada ah ee la bixiyey bisha Maarso 2026.

Kharashaadka mashaariicda ayaa la bixiyey bisha Maarso 2026 kharash dhan **\$35M** oo u dhiganta **41%** wadarta kharashaadka guud. Mushaarka shaqaalaha, kharashaadka la bixiyey bisha Maarso **\$225K** oo u dhiganta **0.65%** wadarta kharashaadka mashaariicda ee la bixiyey. Kharashaadka Agabka iyo Adeegga ayaa lagu bixiyey **\$9M** oo u dhiganta **27%** wadarta kharashaadka mashaariicda ee la bixiyey bisha

Maarso 2026. Deeqaha la siiyo dawlad goboleedyada dalka ayaa lagu bixiyey **\$9M** oo u dhiganta **25%** wadarta kharashadka mashaariicda ee la bixiyey bisha Maarso 2026.

Kharashaadka kale ayaa la bixiyey **\$12M** oo 35% ka ah wadarta kharashaadka mashaariicda, halka Kharashaadka soo iibshashada hantida aan maaliyadda ahayn la bixiyey **\$4M** oo 12% ka aha wadarta kharashaadka Mashaariicda ee la bixiyey bisha Maarso 2026.


### **KHARASHAADKA GUUD JAN-MAR 2026**

Iskudarka kharashaadka la bixiyey bilaha Janaayo iyo Maarso 2026 ayaa ahayd **\$171M** oo u dhiganta **12%** miisaaniyadda kharashaadka guud ee sannadka 2026. Kharashaadka Joogtada ah ayaa la bixiyey **\$122M** oo u dhiganta **18%** kutalagalka miisaaniyadda sannadka ee kharashaadka joogtada ah, halka kharashaadka mashaariicda laga bixiyey **\$49M** oo u dhiganta **7%** kutalagalka miisaaniyadda kharashaadka mashaariicda ee sannadka 2026.

### **KHARASHAADKA JOGTADA AH**

Mushaaraadka shaqaalaha Dawladda ayaa lagu bixiyey **\$86M** oo u dhiganta **23%** kutalagalka miisaaniyad sannadeedka Mushaarka shaqaalaha ee miisaaniyadda kharashaadka joogtada ah, wuxuuna ka yahay **71%** wadarta kharashaadka joogtada ah ee la bixiyey bilaha Janaayo iyo Maarso 2026. Kharashaadka Isticmaalka Agabka iyo Adeegga ayaa la bixiyey **\$23M** oo u dhiganta **13%** kutalagalka miisaaniyadda Isticmaalka Agabka iyo Adeegga ee kharashaadka joogtada ah, wuxuuna **19%** ka yahay wadarta kharashaadka joogtada ee la bixiyey. Kharashaadka soo iibsashadda hantida aan maaliyadda ahayn ayaa la bixiyey **\$600k** oo u dhiganta **3%** kutalagalka miisaaniyadda sannadka ee kharashaadka joogtada ah, waxayna ka tahay **0.49%** wadarta kharashaadka joogtada ah ee la bixiyey bilaha Janaayo ilaa Maarso 2026.

Sida ka muuqato jaantuska 6<sup>aad</sup> oo soo bandhigaya isbarbardhig kharashaadka joogtada ah ee la bixiyey bilaha Jan iyo Mar ee sannadaha 2026 & 2025. Bisha Jan 2026 waxaa la bixiyey kharashaadka joogtada ah **\$26M** oo ka badan **9%** kharashaadka joogtada ah ee la bixiyey bisha Janaayo 2025.



Jaantuska 6<sup>aad</sup>: Kharashaadka Joogtada ah Jan-Mar, 2025-2026


Waxaa la bixiyey bisha Febraayo 2026 Kharash dhan **\$45M** oo **17%** ka hoosayso kharashaadka joogtada ee la bixiyey bisha Febraayo 2025.

Sido kale Waxaa la bixiyey bisha Maarso 2026 Kharash dhan **\$51M** oo **12%** ka hoosayso kharashaadka joogtada ee la bixiyey bisha Maarso 2025.

### **KHARASHAADKA MASHAARIICDA**

Iskudarka Kharashaadka mashariicda ee la bixiyey bilaha Janaayo ilaa Maarso ayaa ahayd **\$49M** oo u dhiganta **7%** kutalagalka miisaaniyadda sannadka ee kharashaadka mashaariicda. Kharashaadka Mushaarka Shaqaalaha ayaa la bixiyey **\$367k** oo u dhiganta **6%** kutalagalka miisaaniyadda sannadka ee mushaaraadka, waxayna ka tahay **1%** wadarta kharashaadka mashaariicda ee la bixiyey bilaha Janaayo ilaa Maarso 2026. Kharashaadka Agabka iyo Adeegga ayaa la bixiyey **\$14M** oo u dhiganta **5%** miisaaniyadda sannadka, waxayna ka tahay **29%** wadarta kharashaadka mashaariicda ee la bixiyey bilaha Janaayo iyo Maarso 2026. Kharashaadka Deeqaha ayaa la bixiyey **\$17M** oo u dhiganta **10%**

kutalagalka miisaaniyadda sannadka, waxayna ka tahay **33%** wadarta kharashaadka mashaariicda ee la bixiyey bilaha Janaayo ilaa Maarso 2026.



Jaantuska 7<sup>aad</sup>: Kharashaadka Mashaariicd, Jan & Mar - 2025-2026

Sida ka muuqato jaantuska 7<sup>aad</sup> oo isbarbardhig ku samaynaya kharashaadka mashaariicda ee la bixiyey bilaha Janaayo ilaa Maarso ee sannadaha 2026 & 2025.

Bisha Janaayo ee sannadaha 2026 iyo 2025, mashaariicda lama bixin kharshaad muuqda, waxaana la bixiyey kharash ka yar **\$200K**.

Balse bisha Feb waxaa la bixiyey kharashaad aad uga badan kharashaadka la bixiyey bisha Janaayo. Bisha Febraayo ee sannadka 2026 waxaa laga bixiyey kharashaadka mashaariicda lacag dhan

**\$15M** oo **76%** ka badan wadarta kharashaadka Mashaariicda ee la bixiyey bisha Febraayo sannadka 2025. Sida kale Waxaa la bixiyey bisha Maarso 2026 Kharash dhan **\$35M** oo **18%** ka hooseeya kharashaadka Mashaariicda ee la bixiyey bisha Maarso 2025.

### ISBARBARDHIGA KHARASH BIXINTA BISHA MAARSO EE 2026 & 2025

Sida ka muuqato shaxda 6<sup>aad</sup> oo isbarbardhigaysa kharashaadkii la bixiyey bisha Maarso ee sannadaha 2026 iyo 2025. Wadarta kharashaadka guud ee la bixiyey ayaa hoos ugu dhacay **(15) %** bisha Maarso 2026 marka la barbardhigo wadarta kharashaadka guud ee la bixiyey bisha Maarso ee sannadka 2025.

	Faahfaahin	Dhabta Mar 2026	Dhabta Mar 2025	Increase /Decrease
	<b>Kharashaadka Joogtada</b>			
21	Mushaarka Shaqaalaha	35,870,997	34,526,838	4%
22	Isticmaalka Agabka & Adeega	10,135,718	11,549,771	-12%
24	Dulsaarka	164,782	168,705	-2%
25	kabka	-	-	-
26	Deeqaha	3,917,816	8,044,342	-51%
27	Faa'idada Bulshada	-	-	-
31	Hantida aan Maaliyadda Ahayn	562,729	3,464,574	-84%
	<b>Wadarta Kharashaadka Joogtada</b>	<b>50,652,042</b>	<b>57,754,229</b>	<b>-12%</b>
	<b>Kharashaadka Mashaariicda</b>			
21	Mushaarka Shaqaalaha	225,880	674,090	-66%
22	Isticmaalka Agabka & Adeega	9,363,953	14,867,543	-37%
25	Kabka	-	-	-
26	Deeqaha	8,717,403	9,440,266	-8%
27	Faa'idada Bulshada	-	-	-
28	Other Expenses	12,241,114	11,728,705	4%
31	Hantida aan Maaliyadda Ahayn	4,075,939	5,643,624	-28%
	<b>Wadarta Kharashaadka Mashaariicda</b>	<b>34,624,289</b>	<b>42,354,228</b>	<b>-18%</b>
	<b>Wadarta Kharashaadka Guud</b>	<b>\$85,276,332</b>	<b>\$100,108,457</b>	<b>-15%</b>

Shaxda 6<sup>aad</sup>: Kharashaadka la bixiyey Bisha Maarso 2026 iyo 2025

Kharashaadka joogtada ah, Mushaaraadka shaqaalaha ayaa la bixiyey **\$36M** bisha Maarso 2026, waxayna oo **4%** ka badan Mushaaraadka Shaqaalaha ee la bixiyey bisha Maarso 2025. Kharashaadka Isticmaalka Agabka iyo Adeegga ayaa la bixiyey **\$10M** oo **-12%** ka hoseeya kharashaadka Isticmaalka Agabka iyo Adeegga ee la bixiyey bisha Maarso 2025. Sidoo kale deeqaha la siiyo dawlad goboleedyada dalka ayaa lagu bixiyey **\$4M** bisha Maarso oo **51%** ka hoosyasa deeqaha la bixiyey bisha Maarso 2025.

Kharashaadka Maashaariicda waxaa la bixiyey **\$35M** bisha Maarso 2026, waxayna ka hoseysaa **18%** wadarta kharashaadka mashaariicda ee la bixiyey bisha Maarso 2025. Soo iibshadaha hantida aan maaliyadda ahayn ayaa lagu bixiye **\$4M** oo **-28%** ka hoseeyaa marka la barbardhigo kharashaadkii soo iibshada Hantida aan Maaliyadda aheyn ee la bixiyey bisha Maarso 2025.

Deeqaha la siiyo dawlad goboleedyada ayaa la bixiyey **\$9M** oo **-8%** ka hoosaysa kharashaadka Deeqaha ee la bixiyey bisha Maarso 2025. Sido kale musharka shaqalaha ayaa la bixiyey kharash dhan **\$225k** oo **-66%** ka hooseeya marka loo barbardhigo mushaarka shaqaalaha ee labixiye bisha Maarso ee 2025.

Kharashaadka Isticmaalka Agabka iyo Adeegga ayaa la bixiyey bilaha Janaayo ilaa Maaros 2026 kharasha dhan \$9M, wuxuuna ka hooseeyaa 37% kharashaadka Isticmaalka Agabka iyo Adeega ee la bixiyey bilaha Janaayo ilaa Maarso 2025.

## ISBARBARDHIGA KHARASH BIXINTA BILAHA JAN ILAA MAR EE 2026 & 2025

Iskudarka kharashaadka Guud ee la bixiyey bilaha Janaayo ilaa Maarso 2026 ayaa ka yar kharashaadka guud ee la bixiyey bilaha Janaayo ilaa Maarso 2025. Kharashaadka joogtada ah ayaa hoos u dhacay **(11) %**, **sidoo kale** kharashaadka mashaariicda ee la bixiyey ayaa hoos u dhacay **-3%** marka la barbardhigo iskudarka kharashaadkii mashaariicda ee la bixiyey bilaha Janaayo ilaa Maarso 2025.

	Faahfaahin	Dhabta Jan-Mar 2026	Dhabta Jan-Mar 2025	Increase /Decrease
	<b>Kharashaadka Joogtada</b>			
21	Mushaarka Shaqaalaha	86,333,172	89,847,577	-4%
22	Isticmaalka Agabka & Adeega	22,896,263	23,513,309	-3%
24	Dulsaarka	1,087,447	1,088,587	0%
26	Deeqaha	10,667,660	12,003,409	-11%
31	Hantida aan Maaliyadda Ahayn	600,654	9,574,158	-94%
	<b>Wadarta Kharashaadka Joogtada</b>	<b>121,585,196</b>	<b>136,027,040</b>	<b>-11%</b>
	<b>Kharashaadka Mashaariicda</b>			
21	Mushaarka Shaqaalaha	367,450	807,035	-54%
22	Isticmaalka Agabka & Adeega	14,264,785	18,860,081	-24%
26	Deeqaha	16,519,091	13,173,647	25%
28	Other Expenses	12,241,114	11,728,705	4%
31	Hantida aan Maaliyadda Ahayn	5,927,933	5,986,414	-1%
	<b>Wadarta Kharashaadka Mashaariicda</b>	<b>49,320,373</b>	<b>50,639,790</b>	<b>-3%</b>
	<b>Wadarta Kharashaadka Guud</b>	<b>\$170,905,569</b>	<b>\$186,666,830</b>	<b>-8%</b>

Shaxda 7<sup>aad</sup>: Iskudarka Kharashaadka la bixiyey Jan- mar 2026 & 2025

Kharashaadka joogtada ah, Mushaaraadka shaqaalaha ayaa la bixiyey **\$86M** bilaha Janaayo ilaa Maarso 2026, waxayna **-4%** ka hooseeyaa Mushaaraadka Shaqaalaha ee la bixiyey bilaha Janaayo ilaa Maarso 2025. Kharashaadka Isticmaalka Agabka iyo Adeegga ayaa la bixiyey **\$23M** oo **-3%** ka hooseeya kharashaadka Isticmaalka Agabka iyo Adeegga ee la bixiyey bilaha Janaayo ilaa Maarso 2025. Sidoo kale deeqaha la siiyo dawlad goboleedyada dalka ayaa lagu bixiyey **\$10M** bilaha Janaayo ilaa Maarso oo **-11%** ka hooseeyaa deeqaha la bixiyey bilaha Janaayo ilaa Maarso 2025.

Kharashaadka Maashaariicda waxaa la bixiyey **\$49M** bilaha Jan ilaa Mar 2026, waxayna ka hooseysaa **-3%** wadarta kharashaadka mashaariicda ee la bixiyey bilaha Jan ilaa Mar 2025. Soo iibshadaha hantida aan maaliyadda ahayn ayaa lagu bixiye **\$6M** oo **-1%** ka hooseeyaa marka la barbardhigo kharashaadkii soo iibshada Hantida aan Maaliyadda aheyn ee la bixiyey bilaha Janaayo ilaa Maarso 2025.

Deeqaha la siiyo dawlad goboleedyada ayaa la bixiyey **\$17M** oo **25%** ka badan kharashaadka Deeqaha ee la bixiyey bilaha Jan-Mar 2025.

Musharka shaqaalaha ayaa labixiyey kharash dhan **\$367k** oo ka hoosaysa **-54%** marka loo barbardhigo mushaarka shaqaalaha ee labixiyey bilaha Jan-Mar ee 2025. Kharashaadka Isticmaalka Agabka iyo Adeega ayaa la bixiyey **\$14M** waxayna ka hoosaysaa **24%** kharashaadka Isticmaalka Agabka iyo Adeega ee la bixiye bilaha Janaayo ilaa Maarsho 2025.

## DHABTA KHARASHAADKA BILAHA JAN ILAA MAR, HAY'ADAHA DAWLADDA

Shaxda 8<sup>aad</sup> waxaa ka muuqdo dhabta kharashadka guud ee Dawladda ee la bixiyey bilaha Janaayo ilaa maarso 2026, iyadoo loo kala saarayo sida ay u isticmaaleen qaybaha shaqo ee loo kala qaybiyo hay'adaha Dawladda. Sidoo kale kharashaadka waxaa loo kala qaaday kharashaadka joogtada ah iyo mashaariicda. Bilaha Janaayo ilaa maarso 2026, waxaa la bixiyey kharash dhan **\$171M** oo u dhigma **12%** wadarta miisaaniyad sannadeedka kharashaadka Guud ee Dawladda.

Faah-faahinta	Dhabta Kharashka Mar 2026	Dhabta Kharashka Jan-Mar 2026	Isbadalka Miisaaniyadda ee Kala wareejimaha	Kutalagalka Miisaaniyadda	% Fulinta
<b>KHARASHKA GUUD</b>	<b>\$85,276,332</b>	<b>170,905,569</b>	<b>1,386,807,242</b>	<b>1,386,807,242</b>	<b>12%</b>
<b>Kharashaadka Joogtada</b>	<b>50,652,042</b>	<b>121,585,196</b>	<b>682,388,785</b>	<b>682,388,785</b>	<b>18%</b>
Hay'adaha Adeeg Maamulka	18,588,023	41,877,815	293,187,551	297,383,037	14%
Hay'adaha Adeeg Amniga	24,955,470	64,347,267	275,537,099	271,333,393	23%
Hay'daha Adeeg Dhaqaalaha	3,284,007	7,339,600	49,833,062	49,809,959	15%
Hay'adaha Adeeg Bulshada	3,824,542	8,020,514	63,831,072	63,862,395	13%
<b>Kharashaadka Mashaariicda</b>	<b>34,624,289</b>	<b>49,320,373</b>	<b>704,418,458</b>	<b>704,418,458</b>	<b>7%</b>
Hay'adaha Adeeg Maamulka	7,163,969	10,612,459	154,906,604	154,906,604	7%
Hay'adaha Adeeg Amniga	-	-	-	-	0%
Hay'daha Adeeg Dhaqaalaha	8,502,764	15,637,230	345,474,219	345,474,219	5%
Hay'daha Adeeg Bulshada	18,957,556	23,070,684	204,037,635	204,037,635	11%

Shaxda 8<sup>aad</sup>: Dhabta Kharashaadka, Hay'adaha Dawladda

### KHARASHAADKA JOOGTADA AH

Kharashka ugu badan waxaa laga bixiyey miisaaniyadda kharashaadka joogtada ah, waxaana la bixiyey kharash dhan **\$122M** oo u dhiganta **18%** wadarta miisaaniyad sannadeedka kharashaadka joogtada ah ee la bixiyey bilaha Janaayo iyo maarso 2026. Kharashaadka joogtada ee la bixiyey ayaa ka ahaa **71%** ka ahaa wadarta kharashaadka guud ee la bixiyey bilaha Janaayo ilaa maarso 2026.

Iskudarka bilaha Janaayo ilaa Maarso ayaa Hay'adaha Amniga lagu bixiyey **\$64M** oo u dhiganta **23%** miisaaniyadda sannadka ee kharashaadka joogtada ah. Miisaaniyada Hay'adaha Adeegga Maamulka ayaa laga bixiyey **\$42M** oo u dhiganta **14%** miisaaniyad sannadeedka kharashaadka joogtada ah ee Hay'adaha Adeegga Maamulka. Hay'adaha Dhaqaalaha ayaa lagu bixiyey **\$7M** oo u dhiganta **15%**, Hay'adaha Bulshada ayaa lagu bixiyey **\$8M** oo u dhiganta **13%** miisaaniyad sannadeedka Hay'adaha Bulshada.

Kharashaadka ugu badan ee miisaaniyadda kharashaadka joogtada ah ee la bixiyey bilaha Janaayo ilaa Maarso 2026 waxaa lagu bixiyey Hay'adaha Adeegga Amniga, waxaana ku baxday, **\$64M** oo **53%** ka ah wadarta kharashaadka joogtada ee la bixiyey bilaha Janaayo iyo Maarso 2026. Hay'adaha Maamulka ayaa lagu bixiyey kharash labaad ee ugu badan waxaana ku baxday **\$42M** oo **34%** wadarta kharashaadka joogtada ah, Ha'aydada Bulshada ayaa lagu bixiyey **\$7M** oo **6%** ka ah wadarta kharashaadka joogtada ah, halka Hay'adaha dhaqaalaha lagu bixiyey **\$8M** oo **7%** ka ah wadarta kharashaadka joogtada ah ee la bixiyey bilaha Janaayo iyo Maarso 2026.

## **KHARASHAADKA MASHAARIICDA**

Kharashaadka Mashaariicda ayaa lagu bixiyey **\$49M** oo u dhiganta **7%** miisaaniyad sannadeedka kharashaadka mashaariicda, waxayna ka tahay **29%** wadarta kharashaadka guud ee la bixiyey bilaha Janaayo ilaa Maarso 2026.

Mashaariicda hoos yimaado hay'adaha maamulka ayaa laga bixiyey **\$11M** oo u dhiganta **7%** miisaaniyadda mashaariicda ee hay'adaha Maamulka. Mashaariicda hoos yimaada hay'adaha dhaqaalaha ayaa lagu bixiyey **\$16M** oo u dhiganta **5%** miisaaniyada mashaariicda ee hay'adaha dhaqaalaha. Hay'adaha Bulshada ayaa lagu bixiyey **\$23M** oo u dhiganta **11%** miisaaniyadda mashaariicda ee haya'daha bulsha.

## **DHAMMAAD**

Lifaaqa 1<sup>aad</sup>: Faahfaahinta Dhabta iyo Miisaaniyadda Kharashaadka Joogtada ah Jan-Mar 2026

Madaxa	Faahfaahinada	Dhabta Jan-Mar	Isbadalka Miisaaniyadda ee Kala wareejimaha	Kutalagalka Miisaaniyadda	%
<b>010100</b>	<b>Xafiiska Madaxtooyada</b>	<b>1,967,243</b>	<b>12,601,848</b>	<b>12,417,366</b>	<b>16%</b>
<b>00000</b>	<b>Undefined</b>	<b>1,967,243</b>	<b>12,601,848</b>	<b>12,417,366</b>	<b>16%</b>
	<b>Mushaarka Shaqaalaha</b>	<b>1,178,173</b>	<b>6,506,754</b>	<b>6,504,072</b>	<b>18%</b>
2111	Mushaarka - Lacag Cadaan ah	233,014	955,293	938,328	24%
2113	Gunnoyin Lacag Cadaan ah	930,849	5,494,221	5,508,504	17%
2114	Kharashaadka kale ee Shaqaalaha	14,310	57,240	57,240	25%
	<b>Isticmaalka Agabka iyo Adeegga</b>	<b>789,070</b>	<b>6,062,323</b>	<b>5,880,523</b>	<b>13%</b>
2211	Kharashka Safarka iyo Shirarka	22,500	1,335,000	1,425,000	2%
2221	Hawlaha Guud	53,914	323,492	323,492	17%
2222	Isgaarsiinta	-	-	-	0%
2223	Shidaalka iyo Saliidaha	122,988	827,959	737,959	15%
2224	Agabka iyo Alaabaha	3,116	18,700	18,700	17%
2225	Dayactir iyo Hagaajin	-	36,000	36,000	0%
2231	Kirooyin	30,000	180,000	60,000	17%
2241	Kharashaadka Waxbarashada iyo Tababaradda	-	-	-	0%
2242	Adeegga Latalinta iyo Khidmadda Latalinta	382,920	2,299,320	2,297,520	17%
2261	Kharashyada Guud ee kale ee Agabka iyo Adeegyada	173,632	1,041,852	981,852	17%
	<b>Deeqaha</b>	<b>-</b>	<b>32,771</b>	<b>32,771</b>	<b>0%</b>
2621	Deeqaha Joogtada ee La Siiyo Hay'adaha Caalamiga ah	-	32,771	32,771	0%
<b>010201</b>	<b>Xafiiska Golaha Shacabka</b>	<b>6,194,799</b>	<b>28,077,941</b>	<b>28,004,201</b>	<b>22%</b>
<b>0102011</b>	<b>Governance and Administration (Lower House)</b>	<b>1,118,188</b>	<b>6,731,111</b>	<b>26,641,961</b>	<b>17%</b>
	<b>Mushaarka Shaqaalaha</b>	<b>786,520</b>	<b>3,706,215</b>	<b>22,437,960</b>	<b>21%</b>
2111	Mushaarka - Lacag Cadaan ah	528,680	2,196,600	2,167,080	24%
2113	Gunnoyin Lacag Cadaan ah	257,840	1,509,615	20,270,880	17%
2114	Kharashaadka kale ee Shaqaalaha	-	-	-	0%
	<b>Isticmaalka Agabka iyo Adeegga</b>	<b>331,668</b>	<b>2,109,221</b>	<b>3,288,326</b>	<b>16%</b>
2211	Kharashka Safarka iyo Shirarka	-	-	562,500	0%
2221	Hawlaha Guud	77,012	295,250	295,250	26%
2222	Isgaarsiinta	-	-	-	0%
2223	Shidaalka iyo Saliidaha	81,920	491,520	245,760	17%
2224	Agabka iyo Alaabaha	39,198	235,200	117,600	17%
2225	Dayactir iyo Hagaajin	41,918	251,526	45,116	17%
2231	Kirooyin	-	243,600	243,600	0%
2241	Kharashaadka Waxbarashada iyo Tababaradda	-	-	280,000	0%
2242	Adeegga Latalinta iyo Khidmadda Latalinta	6,000	78,285	36,000	8%
2261	Kharashyada Guud ee kale ee Agabka iyo Adeegyada	85,620	513,840	1,462,500	17%
	<b>Soo Iibsasho Hantida aan Maaliyadda ahayn</b>	<b>-</b>	<b>915,675</b>	<b>915,675</b>	<b>0%</b>
3111	Dhismooyinka iyo Qaabdhismeedka	-	885,675	885,675	0%
3112	Qalabka iyo Mashinadda	-	30,000	30,000	0%
3113	Hantida kale ee Maguurtada ah	-	-	-	0%
<b>0102012</b>	<b>Lower House Parliamentary Core Business</b>	<b>5,076,611</b>	<b>21,346,830</b>	<b>1,362,240</b>	<b>24%</b>
	<b>Mushaarka Shaqaalaha</b>	<b>4,662,800</b>	<b>18,763,200</b>	<b>-</b>	<b>25%</b>

Madaxa	Faahfaahinada	Dhabta Jan-Mar	Isbadalka Miisaaniyadda ee Kala wareejimaha	Kutalagalka Miisaaniyadda	%
2111	Mushaarka - Lacag Cadaan ah	-	-	-	0%
2113	Gunnoyin Lacag Cadaan ah	4,662,800	18,763,200	-	25%
2114	Kharshaadka kale ee Shaqaalaha	-	-	-	0%
	<b>Isticmaalka Agabka iyo Adeegga</b>	<b>413,811</b>	<b>2,583,630</b>	<b>1,362,240</b>	<b>16%</b>
2211	Kharashka Safarka iyo Shirarka	102,211	720,000	157,500	14%
2221	Hawlaha Guud	-	-	-	0%
2222	Isgaarsiinta	-	-	-	0%
2223	Shidaalka iyo Saliidaha	-	-	245,760	0%
2224	Agabka iyo Alaabaha	-	-	117,600	0%
2241	Kharashaadka Waxbarashada iyo Tababaradda	-	120,090	46,500	0%
2242	Adeegga Latalinta iyo Khidmadda Latalinta	-	-	-	0%
2261	Kharashyada Guud ee kale ee Agabka iyo Adeegyada	311,600	1,743,540	794,880	18%
<b>010202</b>	<b>Xafiiska Aqalka Sare</b>	<b>1,499,960</b>	<b>7,973,196</b>	<b>7,973,196</b>	<b>19%</b>
<b>0102021</b>	<b>Governance and Administration (Senate)</b>	<b>414,944</b>	<b>4,274,696</b>	<b>5,139,396</b>	<b>10%</b>
	<b>Mushaarka Shaqaalaha</b>	<b>157,444</b>	<b>1,905,696</b>	<b>1,905,696</b>	<b>8%</b>
2111	Mushaarka - Lacag Cadaan ah	26,490	161,280	161,280	16%
2113	Gunnoyin Lacag Cadaan ah	130,954	1,744,416	1,744,416	8%
2114	Kharshaadka kale ee Shaqaalaha	-	-	-	0%
	<b>Isticmaalka Agabka iyo Adeegga</b>	<b>257,500</b>	<b>1,609,800</b>	<b>2,474,500</b>	<b>16%</b>
2211	Kharashka Safarka iyo Shirarka	62,800	393,600	393,600	16%
2221	Hawlaha Guud	24,600	147,600	147,600	17%
2222	Isgaarsiinta	-	-	-	0%
2223	Shidaalka iyo Saliidaha	44,500	267,000	267,000	17%
2224	Agabka iyo Alaabaha	43,200	259,200	244,800	17%
2225	Dayactir iyo Hagaajin	6,000	36,000	34,200	17%
2231	Kirooyin	32,400	194,400	194,400	17%
2241	Kharashaadka Waxbarashada iyo Tababaradda	-	-	-	0%
2242	Adeegga Latalinta iyo Khidmadda Latalinta	-	48,000	48,000	0%
2261	Kharashyada Guud ee kale ee Agabka iyo Adeegyada	44,000	264,000	1,144,900	17%
	<b>Soo Iibsasho Hantida aan Maaliyadda ahayn</b>	<b>-</b>	<b>759,200</b>	<b>759,200</b>	<b>0%</b>
3111	Dhismooyinka iyo Qaabdhismeedka	-	703,200	703,200	0%
3112	Qalabka iyo Mashiinadda	-	-	-	0%
3113	Hantida kale ee Maguurtada ah	-	56,000	56,000	0%
<b>0102022</b>	<b>Upper House Parliamentary Core Business</b>	<b>1,085,016</b>	<b>3,698,500</b>	<b>2,833,800</b>	<b>29%</b>
	<b>Mushaarka Shaqaalaha</b>	<b>938,200</b>	<b>2,817,600</b>	<b>2,817,600</b>	<b>33%</b>
2111	Mushaarka - Lacag Cadaan ah	-	-	-	0%
2113	Gunnoyin Lacag Cadaan ah	938,200	2,817,600	2,817,600	33%
2114	Kharshaadka kale ee Shaqaalaha	-	-	-	0%
